

Waaxda Ammaanka Dhulka-hooyo ee Mareykanka  
Xafiiska Bahoowida iyo Ku-lug-yeelashada (OPE)






# Kheyraadyada u furan shakhsiyaadka kujira Khatarta Doksing

Janaayo 16, 2024

## WAA MAXEY DOKSING?









**Doksing** waxaa lagu qeexaa aruurinta xogta shakhsiyeed ee qofka lagu aqoonsan karo (PII) kadibna ku sii deyn teeda dadweynaha iyadoo ujeedoyin xunxun laga leeyahay, sida bahdilida dadweyne, daba-raacraacid, xatooyo aqoonsi, ama bartilmaamedsi dhibaateyn ah.

### TUSAALOOYINKA MACALUUMAADKA XASAASIGA AH

-  **Magaca Buuxa**
-  **Macaluumaadka Xiriirka**
-  **Cinwaanka Guriga**
-  **Xubnaha Qoyska**
-  **Faahfaahinada Goobta-shaqo**
-  **Macaluumaadka Maaliyadeed**

Lambarka Amniga Bulsho

### ILOOYINKA UGU BADAN EE MACALUUMAADKA XASAASIGA AH

-  **Walxaha lasoo dhigo Baraha Bulshada**
-  **Diiwaanada Hanti iyo Maxkamad**
-  **Shaacinada Aroos iyo Tacsiyado**
-  **Warsidayaasha**
-  **Shirar Dadweyne**
-  **Madalo Web, Bogag, iyo Guddiyo Wada-hadal**
-  **Shabakooyinka Aan-la-ilaalin**
-  **Liisaska Diiwaangelinta Cod-bixiyaha**

## SIDEEN NAFTEYDA UGA DIFAACI KARAA DOKSING?

- Taxadir ka yeelo** waxa aad kasoo dhigtid naftaada onleenka, ay ku jiraan sawiro iyo muuqaalo xitaa haddi ay kumeel-gaar-yihiin.
- Ka-saar** PII (cinwaan, taariikh dhalasho, lambar taleefon, iwm) borofayladaada baraha bulsho.
- Dib-u-eeg** kuwa kusoo raaca oo iska-diid codsiyada kayimaada qofwalbo aadan garaneyn.
- Codso** in xogtaada shakhsi laga saaro wedsaayidyada diiwaanada dadweyne. Websayidyo caan ah waxaa kujira **BeenVerified, FastPeopleSearch, Intelius, PeopleFinders, Spokeo, TruthFinder, iyo Whitepages.**
- Saar** abbyo iyo walxo dheeri ku ah interneed-xirahaada ee aan muhiimka ahayn si looga hortago uruurinta xogtaada shakhsiyeed.
- Xadid** la socoshada goob ee abbyada iyo websayidyada. Ka dami adeegyada goob ee abb ama barnaamij kasta.
- Daar** habeynada asturnaana ee baraha bulsho, abbyada, iyo websayidyada kale.
- Degso** xaqiijin laba-jihe ah, isticmaal baasweero adag, hana ku celin isla hal baasweer akoono dhowr ah.

DHS OPE



## SIDEEN NAFTEYDA UGA DIFAACI KARAA DOKSING?



### Codso in La-saaro Nuxur been abuur ah, Xadgudub ah, ama Hanjab ah

Tixgeli inaad u gudbisid codsi saaris ah barnaamijka ama websayidka, sida waafaqsan shuruucda iyo shardiyaada.



### Meel-ku-qor Waxa Dhacaya

Qadari inaad qaadid tallaabooyin si aad u keydisid caddeyn. Keydi dhammaan iimeylada, codadka lagu reebey, iyo fariimaha qoraal aad hesho, oo sawiro-shaashadeed ka qaad ama sawir faalooyinka baraha bulsho.



### Ka-warbixi Dhacada

Haddii aad dareentid khatar ku timaada badqabkaaga jir-ahaaneed ama dareentid in si dambiile ah lagu dhibaateeyey, uga warbixi dhacada shacri-fulinta maxaliga ah, iyo sidookale maamulka barta bulsho ama websayidka.

## KHEYRAAD DHEERI AH & Hagitaan

Kheyraadka & Dhaqamada ugu Fiican Amniga Khadka ee CISA: [cisa.gov/cybersecurity](https://cisa.gov/cybersecurity)

Muhiimadyada Khadka ee CISA: [cisa.gov/cyber-essentials](https://cisa.gov/cyber-essentials)

Talada CISA: Ka-fogaanshaha Xeeladeyn Bulsho iyo Weerarada Khiyaanada: [cisa.gov/tips/st04-014](https://cisa.gov/tips/st04-014)

Aragtiyaha CISA: Wanaaji Amniga limeyl iyo Web: [cisa.gov/publication/enhance-email-and-web-security](https://cisa.gov/publication/enhance-email-and-web-security)

Sawir-macaluumaadka CISA ee Hagitaanka Khatar Baro Bulsho ee loogu tala-galay Shaqaale Iskuul iyo Maamulka: <https://www.cisa.gov/resources-tools/resources/social-media-threat-guidance-school-staff-and-authorities-infographic>

Haddii aad tahay dhibane dambi onleen ah, cabasho u gudbi **Xarunta Cabasho Dambi Internet ah ee FBI-yada (IC3)** ee [ic3.gov](https://ic3.gov)